**Amar n. 10 rep.**

MAAMULKA WALAAYADA TALYAANIGA EE SOOMAALIYA

MAAREEYUHU

MARKUU ARKAY d.p.r. 9 diseembar 1952 n. 2357;

MAKUU HUBSADAY fursadda jirta in la nadaamiyo dugsiyada sare ee soomaaliya;

MARKUU ARKAY D. A. n. 119 29kii luuliyo 1952 (B. U. n. 9 ee 1da sebteembar 1953) ee lagu asaasay machadka garsoorka ee somaliya;

MARKUU ARKAY D. A. n. 138 ee rep. kuna taariikhaysan 11 diseembar 1953 (B. A. n. 10 ee 1da oktoobar 1953) ee lagu asaasay dugsiga barashada Islaamka;

MARKUU ARKAY xeer nadaamiye n. 14 ee rep. soona baxay 11 luulyo 1952 (B. A. n. 8 soo baxay taariikh 10 ki agoosto 1952) ee lagu asaasay dugsiga xirfadaha badda iyo kalluumeysiga;

MARKUU ARKAY D. A. n. 75 ee taariikhda 19 maajo 1952 (B. A. n. 7 soona baxay 28 luulyo 1952) ee lagu asaasay kulliyadda cilmiga beeraha ee Ceel Muunye;

MARKUU DHEGEYSTAY Golaha dhexe ee Dugsuyada;

MARKUU DHEGEYSTAY Guddiga Maamulka;

MARKUU ARKAY qodobka 8aad ee heshiiska ilaalinta dhulka Soomaaliyeed;

MARKUU ARKAY qodobka 4aad ee lagu caddeeyey mabaadi'da dustuuriga ah ee ku lifaaqan heshiiska ilaalinta;

MARKUU ARKAY wareegtada Madaxweynaha Jumhuuriyadda ee 9kii diseembar 1952 n. 2357;

**Wuxuu amray**

**Qod. 1**

Waa la ogolaaday mideynta "Nidaamka guud ee dugsiyada sare ee Soomaaliya".

**Qod. 2**

Maamulaha waxa uu ku eegaa xeerarkiisa u gaarka ah abuuritaanka dugsiyada gaarka a ee lagu soo xusay nadaamka kore iyo sidoo kale soo saarista shuruucda lagu dhisayo iyo kuwa fulinta ee lagama maarmaanka u ah shaqeyntooda.

Muqdisho, 6dii abriile 1954.

MAAREEYE
**Martino**

---

**NADAAMKA GUUD EE KA SHAQEYSIINTA DUGSIYADA SARE EE SOOMAALIYA**

---

## Cutubka 1aad

## DUGSIYADA WAXBARASHADA SARE

### Qod. 1

Dugsiyada waxbarashada ee labaad ee Soomaaliya waa *darajada koowaad iyo labaad.*

Waa dugsiyada waxbarashada labaad ee *darjada koowaad*:

a) Dugsiyada billow xirfadeedka noocii uu doono ha ahaadee;
b) Dugsiga hoose dhexe;
c) Dugsiga aadaabta Islaamka.

Waa dugsiyada waxbarashada labaad ee *darjada labaad*:

a) machadka garsoorka
b) dugsiga dhexe sare;

### Qod. 2

Dugsi kastaa wuxuu leeyahay nadaam u gaar ah oo caddeynaya ula jeeddooyinka, muddada, maaddooyinka iyo barnaamijyada waxbarista, habka soo gelitaanka, dhiirigelinta iyo imtixaannada kama dambeysta ah ee shahaadiga ama diboloomada, iyo xeerarka kale ee nadaam hoosaadka.

## Cutubka 2aad

## SANNAD DUGSIYEEDKA

### Qod. 3

Sannad dugsiyeedku waxa uu billabanayaa 1da luulyo waxa uuna dhammaan 30 juunyo sannadka xiga.

### Qod. 4

Caharradu waxa ay bilaabanayaan, si nadaam ah, maalmaha hore ee bisha luuliyo waxa ayna dhammaanayaan dhammaadka feberaayada xigta.

Waqtiga waxbarista waxa uu u qaybsan yahay saddex saddexbile:

__ seddax billaha koowaad waa ilaa 30 sateember;
__ seddaxbillaha labaad waxa uu dhammaan 15 ka diseembar;
__ seddax billaha seddaxaad waxa uu dhammaan 28ka feberayo.

**Qod. 5**

Imtixaannada kalfadhiga ugu hore waxa ay dhacayaa markiiba marka casharradu dhammaadaan.

Imtixaannada kalfadhiga labaad waxay bilaabanayaan shan iyo tobanka dambe ee juun.

Maamulahu, kadib markuu dhagaysto kormeeraha waxbarashada labaad, wuxuu awood u yeelanayaa inuu cayimo, kalfadhiga labaad ka dib, imtixaanno dheeri ah oo loogu talagalay ardayda awoodi waayey inay ka qeyb galaan kalfadhigii caadiga ahaa sababao adag awgood, kana madaxbanaan rabitaankooda.

Si kastaba ha noqotee, kalfadhiyada dheeraadka ah ee noocaas ah ma dhici karaan ka dib bisha koowaad ee casharrda billowdaan.

**Qod. 6**

Billowga sannad dugsiyeed kasta maamuluhu waxa uu caddeeyaa taariikhda fasaxyada.

**Cutubka 3aad**

**DIIWAANGELINTA**

**Qod. 7**

Iyadoo la ogeysiinayo bulshda, dugsi walba wuxuu daabacaa qawaaniinta waqti ku filan is diiwaangelinta fasalada koowaad iyo kuwa ku xiga, sida ku xusan asaaska lagu dajiyay xeerarkiisa.

Si kastaba ha noqotee diiwaangelinta lama aqbali karo kadib bisha koowaad ee casharradu billowdeen.

**Qod. 8**

Codsiga diiwaangelinta - warqad sharci ah - waa inay muujisaa macluumaadka guud ee ardayga iyo waalidiintiisa ama qof kasta oo booskooda buuxiya, waana inuu la socdaa shahaaddada waxbarashadda loo qorey, sidoo kale caddeyn caafimaad - warqad caadi ah – oo caddeynaysa ardayga inuu ka difaacayo cudurada faafa ee socda. Maamulka caafimaadka ee MTMS ayaa bixin doona shahaaddadan oo bilaash ah.

**Qod. 9**

Haddii maamuluha dugsigu inta lagu gudajiro sannad dugsiyeedka uu ka shakiyo arday in uu qabo cudur faafa, waxa uu amri karaa in ardaygu u tagu dhakhtarka caafimaadka dugsiga si loo baaro.

**Qod. 10**

Waa reeban tahay waqtiga sannad dugsiyeedku socdo in dugsi ilaa dugsi kale loo kala gudbo.

## Cutubka 4aad

## KALA SAARID IYO DALLACSIIN

### Qod. 11

Intii lagu gudajiro waqtiga casharrda iyo sidoo kale waqtiga imtixaannada calaamadaha la bixiyo waxa lagu cabbiraa toban dhibcood.

Ku filnaan ama abaalmarin maaddo kasta, ama koox maadooyin laxiriira, waxa lagama maarmaan ah ugu yaraan 6 dhibcood oo tobanlayda ka mida.

### Qod. 12

Dhammaadka seddxbille kasta macallimiinta fasal walba waxay ku kulmayaan gudiga fasalka iyada oo gudoomiye uu u yahay maamulaha dugsiga, si macalim kasta loogu xilsaaro maaddadiis ama koox maaddooyin la xariira dhibcaha saddexbileyda ee uu kasbaday arday walba.

Dhibcaha waxaa lagu qoray diiwaanka guud iyo kaarka warbixinta arday kasta.

### Qod. 13

Astaamaha loo xilsaaray dhammaadka saddexbillaha ugu dambeeya ama codbixinta kama dambaysta ah, haddii tan la saadaaliyay qawaaniinta dugsiyada gaarka ah, waxay ku dhici karaan imtixaannada kalfadhiga koowaad ee dhammaadka ujeeddada sare loogu qaadayo fasalka sare.

Xaaladda noocaas ah ardayga ayaa dib loogu diraa imtixaannada kalfadhiga labaad ee maaddooyinkaas ama kooxo maadooyinka la xiriira oo aan la soo caddeyn 6 dhibcood qiimeynta kama dambeysta ah.

### Qod. 14

Guddiga fasalka, haddii ku filnaan la’aanta lagu soo sheego warqadda codbixinta ee kama dambeysta ah ay aad u badan tahay ayna suurtagal ahayn u diyaarin ku filan imtixaannada kalfadhiga labaad, waxay ku dhawaaqi karaa ardaygaas in "la diiday".

Ardayda “la diiday” waa laga reebaa imtixaannada kalfadhiga labaad waana inay ku celiyaan sanadkaas.

### Qod. 15

Marka laga yimaado astaamaha kasbashada, Golaha fasalka wuxuu arday kasta siinaa dhibco dugsiyeed xagga aadaabta oo ku cabbiran toban dhibcoodley.

Kuwa soo gudba seddaxbilleyda seddexaad ee kusoo gudbay darajada anshaxa wax ka yar 7 dhibcood oo ka mida tobanlayda waxaa laga reebaa kor u qaadista codbixinta kama dambeysta ah iyo imtixaanka kalfadhiga koowaad.

### Qod. 16

Magacaabista iyo tilmaamidda guddiyada imtixaanka dugsiyada gaarka ah waxaa lagu dejiyay xeerarka dugsi walba.

**Qod. 17**

Murashixiinta qeybtii imtixaanka koowaad aan looga soo warbixin ku filnaanshaha hal maado ama ka badan, waxay awood u leeyihiin in ay ku celiyaan imtixaannada kalfadhiga labaad.

**Qod. 18**

Murashixiinta muujiya imtixaanka hore ku filnaasho la’aan iyo liidasho badan, ayna suurtagal u ahayn diyaarinta imtixaan labaad waa la “diidi” karaa.
Murashixiinta la caddeyay “ diidmadooda” ma aadi karaan kalfadhiga imtixaanka labaad.

**Qod. 19**

Murashixiinta aan lagu warbixin ku filnaanshaha imtixaannada kalfadhiga labaad waxaa lagu dhawaaqaa "in ay dheceen".

**Qod. 20**

Ardayda la diiday sida ay qabaan qodobada 14, 18 iyo 19 waa ku soo celin karaan sannadka.

Lama ogola in lagu soo celyo sannadka in ka badan hal mar isla dugsiga.

**Cutubka 5aad**

**MAQNAANSHAHA**

**Qod. 21**

Macallimiintu waxa ay dhowri doonaan in ay ku qoraan magacyada ardayda maqnaata diiwaankooda iyo kan fasalka.

Ardayda ka maqnaata casharrada, si loogu ogolaado fasalka waa in ay u keenaan maamulha caddeymo ku saabsan maqnaanshahooda, kaasoo xukumi doona run ahaanshaha caddeynta lafteeda.

Haddii Maamuluhu u arko inay habboon tahay, waxaa la martiqaadi karaa waaliddiinta ama cidda la meel joogta in ay caddeeyaan maqnaansha ilmahooda.

**Qod. 22**

Haddii ay dhacdo maqnaansho jirro in ka badan shan maalmood, si dib loogu celiyo casharada, ardaygu waa inuu la yimaadaa caddeyn caafimaad oo cadeyneysa inuu soo kabtay oo cadeynayo inuu ardayga dib u bilaabi karo casharrada.

Xataa Shahaadooyinkaas sidoo kale waa bilaash, sida qodobka 8aad.

**Qod. 23**

Lama kala saari karo warqadda qiimeynta kama dambaysta ah ama looma oggolaan karo kalfadhiga koowaad ee imtixaanka kaasoo maqnaanshaha aan loogu kala soocin ugu yaraan laba meelood, oo ay ku jirto saddexbille saddexaad.

**Cutubka 6aad**

**CIQAABTA EDBINTA EE ARDAYDA**

**Qod. 24**

Ciqaabta edbinta ee soo socota ayaa la saaraa ardayda aan hubinin waajibaadka dugsiga isla markaana ku xadgudba anshaxa, macallimiinta, akhlaaqda, damiirka, iyada oo markasta loo eego halista ay leeyahay xadgudubkiisu:

a) Digniin gaar ah ama fasalka dhexdiisa;
b) ka fogeyn casharraka:
c) ka joojinta casharrada ilaa ugu badnaan 15 maalmood;
d) eryid ilaa dhamaadka casharraka, iyo ka reebid dalacsiinta qiimeynta ugu dambeysa ama kalfadhiga koowaad ee imtixaanka;
e) xannibaad kusoo rogid illaa casharrada dhammaadkooda, in laga joojiyo qiimeynta u dambeysa iyo labada kalfadhi ee imtixaanka;
f) machadka in laga cayriyo;
g) in laga ceyriyo dhamaan machadyada heerka labaad ee kuyaala degaanka.

**Qod. 25**

Marka ay xadgudubyada dhacay carqaladeeyaan waxqabadka caadiga ah ee dugsiga, la ma sari karo ciqaab ka yar tan lagu tilmaamay xarafka c) ee qodobka hore.

Xadgudubka loo geysto akhlaaqda, macallimiinta, dugsiga, damiirka, diinta, maamulka, laguma ciqaabi karo ciqaab ka yar tan ku xusan xarafka d) ee qodobka hore.

**Qod. 26**

Ciqaabaha lagu sheegay xarfaha a) iyo b) qodobka. 24 waxaa saari karaa macalimiinta ama maamulha dugsiga.

Ciqaabta ku xusan xarafka c) Waxaa soo rogi Maamulaha. Ciqaabaha lagu sheegay xarfaha a), b) iyo c) waxaa lagu xisaabtami doonaa qiimeynta warbixinta seddexaad ee aadaabta.

Ciqaabaha lagu sheegay xarafyada d), e), f) iyo g) waxa saari kara guddiga brofasoorada, kuwaas oo xisaabta ku darsanaya dalabkooda, sawirka ardayga iyo dhammaan duruufaha kale ee lagu dabaqi karo si loo gaaro culeyska dhabta ah iyo ciqaabta ku habboon.

Ciqaabta lagu sheegay xarafka d) waxaa sidoo kale lagu soo rogi karaa kuwa ka maqnaada casharrada in ka badan 10 maalmood sabab lagu qanco la'aanteed.

**Qod. 27**

Ciqaabta ka timaadda xarafka b) iyo wixii ka dambeeya waa in loogu wargaliyaa waalidiinta ama qof kasta oo booskooda qaata.

Ceyrin kadib, ardayga waxaa loo ogolaadaa casharrada kaliya haddii ay soo raacaan waalidkiis ama qofka masuulka ka ah.

**Qod. 28**

Ciqaabaha lagu tilmaamay xarafyada d), e), f) iyo g) waxaa maamuluhu la socodsiin doona Maamulka kormeerayaasha heerka labaad si loo ansixiyo.

## Cutubka 7aad

## FALALKA DUGSIGA

### Qod. 29

Dugsi kasta, marka laga yimaado diiwaanka iyo falalka looga baahan yahay xeerarka hadda jira, waa in la siiyaa:

1) Diiwaanka Guud ee ardayda, oo si guud arday walba lagu qoro si kala soocan natiijooyinka saddexbillayaasha ah, iyo imtixaannada oo wato natiijooyinka kama dambeysta ah. Natiijada kama dambaysta ah waxaa lagu ansixiyaa saxiixa Maamulaha. Diiwaanka guud waa mid dhab ah dhinacyada oo dhan waxaana kaliya laga soo saari karaa xogta shahaadooyinka daraasadda la siinayo dhinacyada ay khuseyso.
2) Hal Diiwaanka shahaado, oo lambar isxiga leh laguna hayo shahaado kasta oo uu soo saaray dugsiga, iyo dhammaan faahfaahinta falka laftiisa iyo saxiixa qofka qaatay.
3) Hal Diiwaan Gelid iyo Bixid ee shahaadooyinka Dibloomada rukhsada.

Bixinta Diploma kasta, waa in lagu xusaa macluumaadka guud ee qalinjabiyaha, waana in la muujiyaa taariikhda dibloomaasi la helay iyo taariikhda la bixiyay.

4) Aqoonsiga shaqsiyeed ee ardayda.
5) Hal Diiwaan ee ciqaabta ardayda.
6) Hal Diiwaan ee wareegtooyinka.
7) Diiwaanka hab maamuuska Guud.
8) Diiwaanka hab maamuus oo u gaar ah in uu heysto Maamulahu.
9) Hal Diiwaan ee daqiiqadaha, kulamada, Golaha fasalka, Golaha Brofasoorada iyo guddiyada imtixaannda.
10) Hal Diiwaanka shaqaalaha waxbarida ee macluumaadka guud, heerka aqoonta iyo adeegga iyo cinwaanka la cusboonaysiiyey midkastaba.
11) Hal diiwaan ee maqnaashaha brofasoorada kaas oo tusinaya laguna qoro taariikhda maqnaashaha iyo magcahooda iyo saacadaha ay maqnaayeen.
12) Hal diiwaan ee casharrada gaarka ah ee ay bixiyeen macallimiintu.
13) Meesha ay ka jirto Maktabad, cusboonaysiisan oo habraac leh iyo diiwaanka amaah qoridda.
14) Buug_yaraha diiwaangashan kuna qoran gacanta.

### Qod. 30

Sanad kasta dugsiga wuxuu bixiyaa kaarka warbixinta, taas oo ay u dheer tahay guud ahaan, calaamadaha saddexbillaha ee uu kasbaday iyo anshaxa iyo natiijada ugu dambeysa ee qiimeynta iyo kuwa imtixaannada.

Ka dib kala soocidda seddexbillaha koowaad iyo kan labaad, kaarka warbixinta waxaa lagu wareejinayaa ardayga si uu u soo tuso qoyskiisa oo dib ugu soo celiyo dugsiga iyada oo uu saxiixay waalidkii ama qofkii booska waalid gala.

Kaarka warbixinta waxaa si kama dambeys ah loogu wreejiyaa ardayga bilowga sanad dugsiyeedka xiga ama marka uu ka tagayo dugsiga si aan soo noqod lahayn.

**Qod. 31**

Fasal kastaa wuxuu lahaan Diiwaan u gaar ah marka laga yimaado liiska ardayda, maqnaanshaha iyo maaddooyinka barista oo lagu qoro maalinwalba.

Macallimiintu waxay saxiixayaan agagaarka maaddooyinkooda. Waxaa sidoo kale jira meel loogu talagalay qoraalada anshax marin ama qoraallo kale oo fasalka la xiriira.

**Qod. 32**

Borofasoor walba waxaa la siinyaa Diiwaanka kala soocidda iyo maqnaanshaha ardayda. Diiwaankaas waxa sidoo kale uu lahaan meel lagu qeexo barnaamijka uu macalinku ku bixinayo cashar kasta.

**Qod. 33**

Jadwalka toddobaadlaha ee casharrada waa in lagu muujiyaa diiwaanka dugsiga.

## Cutubka 8aad

## MAAMULAYAAL IYO MACALLIMIIN

**Qod. 34**

Dugsi walba waxaa maamula Maamule uu magacaabay Maareeyahu.

**Qod. 35**

Maamulaha waxaa laga yaabaa in laga dhaafo - gabi ahaanba ama qayb ahaan - waxbaridda marka dugsigu gaarayo 150 arday.

**Qod. 36**

Maamuluhu waxa uu soo jeedin karaa in la magacaabo maamule ku xigeen kaasoo geli kara booskiisa dhan kasta markuu maqan yahay.

Maamule ku xigeenka waxaa magacaaba kormeeraha waxbarashada dugsiyad heerka labaad.

**Qod. 37**

Maamuluhu waxa uu mas'uul ka yahay socodsiinta wanaagsan iyo edbinta ardayda dugsiga iyo sidoo kale maamulka la xiriira iyo xafiisyada xoghaynta.

Maamuluhu sidoo kale waxa uu mas'uul ka yahay lacagaha hawlgalka, agabka dugsiga iyo agabka waxbaridda ee la siiyo dugsiga si waafaqsan xeerarka uu u dejiyey Maamulku.

**Qod. 38**

Dhamaadka sanad dugsiyeed kasta, Maamuluhu waxa uu soo bandhigaa warbixin faahfaahsan oo ku saabsan horumarka dugsiga waxa uuna u soo gudbiyaa nuqul Kormeeraha Waxbarashada Dugsiyada heerka labaad, iyo sidoo kale asaga oo qeexaya baahi kasta.

**Qod. 39**

Macallimiinta waxaa looga baahan yahay inay siiyaan wada shaqeynta ugu sareysa Maamulaha si waxqabadka waxbaridda iyo edbinta ugu wanaagsan uu u helo dugsiga ay u shaqeeyaan.

**Qod. 40**

Golaha Brofesoorada iyo Goleyaasha Fasalka waxaa isugu yeeraya Maamulaha shirarka caadiga ah iyo kuwa aan caadiga ahayn.

Waa shirar caadi ah kuwa la qabto billowoga sannad dugsiyeed kasta, si loo doorto barnaamijyada waxbaridda la xiriira, doorashada xafiisyada (Xoghayaha Golaha, maktabad_hayaha, iwm.), iyo dhamaadka saddexbille kasta meelmarinta kasbashada iyo cod bixinta anshaxa.

Waa shirar aan caadi ahayn kuwa uu u arko Maamuluhu in loo baahan yahay qabashadooda, si loo meel mariyo ciqaabaha edbinta ee aardayda iyo in laga hadlo amuuraha horumarinta ku saabsan tacliinta iyo anshaxa ee dugsiga.

Go'aannada waxa lagu gaaraa cod dheeri.

Haddii codbixinto isla ekaato kan maamulhaa ayaa lagu ansixiyaa. Shir walba waa in loo diyaariyo qoraalada shirka diiwaan ku habboon.

Qoraalada laga qabto shirka waxa saxiixayo Maamulaha iyo xoghayaha Guddiga.

**Qod. 41**

Macallimiinta, haddii midwlba waqtiga casharrada u ogolaanayo, waxa laga rabaa casumaadda Maamulaha, si baddal u helaan, iyada oo aan wax baddal ah la siineyn, macallimiinta maqan, muddo 4 maalmood ah. Waqtiaas wixii ka dambeeya, waxay xaq u yeelan doonaan baddal loo dejiyey saacado kasta oo dheeri ah.

**Qod. 42**

Dhammaadka sannad Dugsiyeed kasta Maamuluhu waxa uu buuxiya si nuqullo nuqul leh ogeysiiska qiimenynta ee macallimiinta waxbaridda oo ka mid ah qoraalada shahaadooyinka shahaadada shaqaalaha waxbaridda, sida ku xusan darajooyinka soo socda:

__ heer sare ah;
__ aad u wanaagsan
__ wanaagsan;
__ ku filan;
__aan ku filneyn.

Waxa loo diraa kormeerka waxbarashada dugsiyada heerka labad, kaas oo ku kordhinaayo qiimentiisa iyo argtidiisa.

Qoraallada u qalmidda waxaa lagu dhammeystiri doonaa foomamka ay soo saarto hay'adda kormeerka waxbarashada dugsiyada heerka labaad.

Muqdisho, 6dii abriil 1954.

MAAREEYE
**Martino**